

## Somali

### Xeerarka ka amaahasashada maktabadda Rosenhof VO

- Maktabadda waxa buugaagta ka amaahan kara ardayda dugsiya Rosenhof VO wax ka dhigta oo dhan
- Si lagu siiyo kaarka maktabadda waa in aad tusto maktabadda aqoonsigaaga.. Kaarkaasina waxaad ku adeegsan kartaa maktabadda Rosenhof VO oo keliya. Waxaad isticmaali kartaana kaar maktabadd kale, laakiin waa in laga diiwaan geliyo halkan inta aan la isticmaalin. Kaarka amaahasashada waa in mar walba la sito marka maktabadda la joogo.
- Waxaad amaahan kartaa buugaagta dugsiya lagu dhigo. Waana in la soo celiyo markuu kooraskaagu dhammado ama dugsiya aad joojiso.. BUUGAAGTA OO DHAN waa in la soo celiyo fasaxa xagaaga ka hor.
- Haddii aad bedelayso buugaagta wax lagu dhigo, waa inaad marka hore soo celiso buugaagtii hore eed amaahatay intaanad kuwa cusub amaahanin.
- Maktabadda waxa kale oo aad ka amaahan kartaa qaamuusyada, buugaagta naxwaha, cajaladaha dhegaysiga, DVD-ga iyo buugaag kale. Muddada la haysan karo waa afar todobaad, marka laga reebo DVD-ga oo la haysan karo todobaad keliya.
- Haddii aad ku soo celin waydo buugaagta wakhtigii kama dambaysaka ahaa, waxa lagu soo diri doona SMS ku xasuusinaya in aad buugaagta maktabadda soo celiso. Wakhtiga buugaagta la haysan karo waa la cusboonaysiin karaa ilaa 3 jeer, haddii anay cid kale u baahnayn in ay amaahato.  
Haddii anad cusboonaysiin muddada ammahada ama anad soo celin marka laba jeer lagu xasuusiyo waxa lagu soo diri doonaa waaraaq lagaaga dalbanayo inaad bixiso qiimaha waxa aad amaahatay. Haddii anad bixin ama ku soo celin wakhtiga lagu qabtay gudihii waxa lagu soo diri doonaa bil/ faktuuro ah qiimaha waxaad amaahatay + lacag ah 100 kroon. Haddii anad bixin lacagta waxa kayska loo dirayaa wakaalada dayn ururinta.
- Si fiican u daryeel buugaagta iyo qalabka kale ee aad ka amaahato maktabadda. Xusuusnow in dadka kale ay amaahan doonaan hadhaw.
- Buugaagta waxba kuma qori kartid. Haddii aad wax ku qortid buugaagta ama aad halaysid lacagta buuga waa inaad bixiso. Qiimaha buugaagtu waa 400, - oo kroon buugiiba. Qalabyada kalena qiimohoogu wuu kala duwan yahay.